

Dhaqista gaariyaasha Warwareega

Barnaamijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. **Tilmaamahaan gaarka u ah ganacsiyada dhiqista gaariyaasha ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.**

- ❑ Si ku meel gaar ah u dabool meelaha u dhow marinnada daadka si looga hortago in biyaha dhaqmadu galaan nidaamka qaada biyaha daadka.
- ❑ Ku dhaq gaariyaasha meelo biyaha celinaaya (meel taag ah, ciida, iwm.)
- ❑ Marka aad ku dhaqayso gaariyaasha geeska wadada, ku aruuri oo ku hay dhammaan biyaha dhaqmada si loogu daadsho qaab waafaqsan dhammaan sharciyada quseeya iyo xeerarka ama faadinta biyaha qashinka ah oo lagu daadsho meelaha siman sida dhulka falan.
- ❑ Dhaqaalee biyaha adoo adeegsanaaya salad iyo tuubada biyaha oo leh meel biyaha la xiro ama adeegso qaababka nadiifinta qalalan sida xaaqida, tirtirista, hawo ku buufinta ama sifaynta.
- ❑ Qabo oo ku shub kiimikooyinka ka yimaada matoorka iyo biyaha lagu dhaqo. U daadi qaab waafaqsan sharciyada iyo xeerarka quseeya.
- ❑ Adeegso agabka nadiifinta oo aan lahayn sun khatartooduna yar tahay.
- ❑ Yaree ama baabi; adeegsiga saabuunnaha, waxyaabaha saliida xaaqa, ama agabka kale ee nadiifinta.
- ❑ Meesha ku diyaarso agabka iyo qalabka muhiimka u ah kahortaga daadashada ee dhammaan gaariyaasha oo dhigo meel aad ka gaarto.

! Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha roobka qaada ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeedaa Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO). **Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.**

Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.



waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayo keliya
dhawr talaabo.

waad ku
mahadsan tahay
inaad doorkaaga ka
qaadatay difaacida
marinadeena biyaha.

